

# Su'aalaha inta badan Tirakoobka 2020 la iska weydiyo.

CARSUS MUDAN  
DIIWAANKA  
KU SAABSAN  
BULSHADA

Guriyeyn

Daryeelka  
caafimaadka

Wadooyinka

Iskuulada

Gaadiidka

Dabdemiska

## Waa maxay tirakoob?

Dastuurka Mareykanka wuxuu u baahan yahay inay dowladdu tiriso qof walba oo ku nool Mareykanka 10kii sano hal mar. Qof kasta waa in la tiriyo, oo lagu daro dhallaanka, carruurta, kuwa aan heysan dhalashada, iyo waayeelka. Qoys walba waxaa laga rabaa in ay buuxiyaan foomka tirakoobka oo loo yaqaano 'ShoWrt Census' gu'ga 2020, waxaa foomka laga buuxin karaa taleefanka, internet-ka warqada foomka.

## Ka qeybgalka tirakoobku waa xuquuqdeena iyo masuuliyadeena.

### Muxuu tirakoobka muhiim u yahay?

Xogta tirakoobka waxay gacan ka geysaneysaa maalgelinta barnaamijyada muhiimka ah ee dowladda waxayna go'aamisaa codkeenna siyaasadeed:

- Xog sax ah oo ku saabsan tirada dadka ku nool Mareykanka waxay kaalmeeynaysaa dowladda inay go'aan ka gaarto si ay u bixiso \$ 800 bilyan oo maal-gelin federaal ah sanad walba gobolada, degmooyinka iyo magaaloyinka. Tan waxaa ku jira lacag loogu talagalay barnaamijyada sida Caafimaadka(Medicaid), Guryeynta (sec 8), Xannaanada dhallaanka (Head Start), Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Dheeraadka ah (SNAP), iyo iskuulada maxalliga ah.
- Xogta saxda ah ee tirakoobka ayaa go'aamineysa inta wakiil ee aan ku leennahay aqalka Baarlamaanka, waxayna naga caawisaa inaan helno matalaad cadaalad ah oo heer gobol iyo heer dowladeedba.

### Xogta Tirakoobka Ma xafidantahay?

HAA! Sida sharciga waafaqsan, macluumaadka shaqsigaa aad ku bixiso foomka tirakoobka waa mid sir ah oo aan lala wadaagi karin hay'adaha kale ee dawladda, oo ay ku jiraan Hay'adaha Amniga, laanta socdaalka, maxkamadaha, iyo mas'uuliyiinta guryaha ama hantiilayaasha guryaha kireeyo.

### Tirakoobka ma weydiiyaa Jinsiyadda?

MAYA! Maxkamadda Sare ayaa diiday isku day maamulka Trump sameeyeen ee ahayd in lagu daro foomka Tirakoobka Su'aal dhalasho. Su'aasha muwaadinimada laguma dari karo Tirakoobka foomka sanadka 2020.



SAN DIEGO AND IMPERIAL COUNTIES  
CENSUS OUTREACH COALITION



RICH Refugee & Immigrant Census Hub



@countme2020

Get Counted!



countme2020.org



TIRAKOOBKA

## Goorma iyo Sideen u buuxiyaa Foomkayga Tirakoobka?

Tirakoobka wuxuu bilaabmayaa bisha Maarso 2020, markaas oo aad awoodi doonto inaad buuxiso foom gaaban, 8-su'aalood ah Internet-ka, khadka taleefanka, ama adigoo codsanaya warqada foomka ah.

- Internet-ka: Bartamaha bisha Maarso, qoys kasta waxaa la siinayaa kaadh u tilmaamaya in ay tirakoobka ka buuxiyaan internet-ka ama isticmaalaan taleefanka casriga ah adoo isticmaalaya furaha ama numberka baaqa ah ah ee ku qoran kaadhka. Waxaa jira hal tirakoob foom oo u baahan in qof walba oo qoyska ka tirsan uu buuxiyo, laakiin waa inay ku jiraan qof kasta oo gurigaaga ku nool.

AMA

- Taleefan ahaan: Waxaa kaadhka ku yaal lambar taleefan oo aad wici karto haddii aad rabto si loo dhammeeyo Tirakoobka taleefoonka.

AMA

- Boostada: Waxaad wici kartaa oo weydiisan kartaa Boostada foomka Tirakoobka. Haddii aadan weli dhammaystirin Foomka Tirakoobka illaa Abril dhexdeeda, foom warqad ah ayaa si otomaatik ah loogu soo diri doonaa.

AMA

- Shaqsi ahaan: Haddii reerkaagu uusan buuxinin foomka Tirakoobka dhamaadka bisha Abriil, Xafiiska Tirakoobka wuxuu gurigaaga u soo diri doonaa qof la yiraahdo "Tiriye" si uu u hubiyo in qof walba la tirin doono.

**Hubi in qofkasta oo kujira gurigaaga la qoro, oo ay ku jiraan dhallaanka, carruurta, kuwa aan heysan dhalashada, iyo waayeelka!**

## Maxaa dhacaya haddii aan u baahanahay foomka oo luqad kale ah ama aan u baahdo caawinaadda buuxinta foomka?

Foomka Tirakoobka Internet-ka ah waxaa laga heli doonaa 12 luqadood oo dheeri ah: Carabi, Faransiis, Fiyatnaamiis, Isbaanish, Shiine, Tagalog, Kuuriyaan, Ruush, Haitian Creole, Jabbaan, Boortaqiiska, iyo Boolishka. Waxa kale oo aad foomka ku buuxin kartaa telefoonka adoo isticmaalayo luqadahan oo adeegsanaya nambarka taleefanka ee ku qoran kaadhka aad ka hesho Xafiiska Tirakoobka bisha Maarso 2020.

AMA

Laga bilaabo Maarso 2020, Qaxootiga & amp; Hubinta Tirakoobka Soogalootiga ayaa yeelan doonta rugta Su'aalo-weydiinta ama Xarumaha Caawinta (QAC) ee San Diego County oo aad ka heli karto caawimaad si aad u dhammaystirtid foomkaaga. Shaqaalaha Foomka tirakoobka waxay ku hadlaan 14 luqadood oo kala duwan. Haddaad u baahatahay Liiska luqadaha iyo goobaha QAC, fadlan booqo [www.panasd.org/census/](http://www.panasd.org/census/)

*Wixii Su'aalo ah ama aad u baahan tahay caawimaad xagga tirakoobka? Booqo [www.panasd.org/census](http://www.panasd.org/census) ama wac 619-363-4750*



TIRAKOOBKA